

Wax-ka-beddello lagu sameeyey tallaabooyinka aageed ee Viken

Tirooyinka faafidda cudurka ee Viken way sii yaraanayaan, laakiin degmooyinka qaar ayay faafidda cudurku weli sarraysaa. Kaddib markii soo jeedinno uga yimaadeen Agaasinka Caafimaadka, Machadka Caafimaadka Dadweynaha iyo guddoomiyaha gobolka, waxa ay dawladdu go'aamisay in wax-ka-beddel khuseeya lix degmo oo ka mid ah Viken lagu sameeyo heerarka tallaabooyinka. Degmooyinka weli ku sii jiraya tallaabooyinka aageed waa in ay nidaamkaas ku sii jiraan ilaa iyo axad 16-ka May. Dib u eegis cusub ayaa la samayn doona hal toddobaad kaddib.

Lillestrøm, Lørenskog iyo Rælingen waxa laga wareejinaya tallaabooyinka heerka A waxaana loo wareejinaya B laga bilaabo khamiis 6-da May, iyadoo shuruudku yahay in iyagu soo rogaan tallaaboojin dheeraad ah oo ay dhedooda ka wada socdaan isla markaana Oslo kala wadashaqaynayaan. Degmada Ullensaker waxa laga wareejinaya tallaabooyinka heerka A waxaana loo wareejinaya B laga bilaabo isniin 3-da May. Degmooyinka Eidsvoll iyo Nannestad waxa laga saaraya nidaamka tallaabooyinka aageed laga bilaabo isniin 3-da May.

- Tallaabooyinkan ka hortagga cudurka ee adag ayaa gacan ka geysanaya in ay hoos u sii dhacdo faafidda cudurka ee Viken. Inkastoo ay tirooyinka faafidda cudurku weli sarreyaan marka la eego degmooyinka xadka la leh bariga Oslo, haddana hoos u dhaca faafidda ee ka jira afarta degmo ee Romerike ee ku jiray tallaabooyinka heerka A laga soo bilaabo 16-kii Maarso ayaa tilmaamaya in iyaga loo beddello heerka B. Arrintaas waxa u shuruud ah in degmooyinka Lillestrøm, Lørenskog iyo Rælingen ay nidaamyadooda waafajiyaan kuwa Oslo, oo ay soo rogaan tallaaboojin adag oo isu-duwan oo u sii dheer tallaabooyinka aageed, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Agaasinka Caafimaadka, Machadka Caafimaadka Dadweynaha, Guddoomiyaha Gobolka Oslo iyo Viken iyo degmooyinka ay khuseyso ayaa wadahadallo ka yeeshay arrintan. Degmooyinka intooda badani way taageereen soo-jeedinta.

Waxa wacan in degmooyinka qaarkood weli lahaadaan tallaabooyin degmo oo adag oo u sii dheer tallaabooyinka heerka B

Degmooyinkan ayaa laga wareejinaya tallaabooyinka heerka A loona wareejinaya B laga bilaabo saqda dhexe, habeenka khamiiska 6-da May:

- Lillestrøm
- Lørenskog
- Rælingen

Degmooyinkan waxa laga rabaa in ay dhexdooda wadashaqeeyaan islamarkaana la shaqeeyaan Oslo si ay u soo rogi karaan tallaabooyin maxalli ah oo ku filan xakamaynta dhaqdhaqaqa iyo kulannada dadka. Waxa tallaabooyinkaasi soo raacayaan tallaabooyinka aageed, waxaana la rabaa in lagu saleeyo xaaladda faafidda cudurka ee degmooyinka iyo aagaba.

Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxa uu saddexdan degmo kula talinaya in ay soo rogaan tallaabooyinkan heerka degmo ah iyadoo ay islamarkaana habboon tahay in ay waafajiyaan kuwa Oslo:

- In ay xidhaan suuqyada, ama ay xidhaan goobaha laga cunteeyo ee ku yaalla suuqyada iyadoo la barbar wadayo ilaalin dheeraad ah iyo in la xaddido tirada dadka soo booqanaya suuqa.
- In goobaha kale ee laga cunteeyo laga madnuuco in cuntada lagu cunno gudaha, laakiin la oggolaado in goobta dibeddeeda lagu cunno
- In la xaddido tirada dadka joogi kara qabanqaabooyinka la oggol yahay marka la eego tallaabooyinka heerka B (aasasku waa ugu badnaan 50 qof, isu-immaanshooyinka ku saabsan diimaha iyo falsafooyinka waa ugu badnaan 10 qof).

Degmooyinkan ayaa laga wareejinaya tallaabooyinka heerka A loona wareejinaya B laga bilaabo saqda dhexe, habeenka isniin 3-da May:

- Ullensaker

Degmooyinkan ayaa ku sii jiraya tallaabooyinka heerka B:

- Asker
- Bærum
- Drammen
- Enebakk
- Fredrikstad
- Frogn
- Halden
- Indre Østfold
- Lier
- Moss
- Nordre Follo
- Råde
- Sarpsborg
- Vestby
- Ås

Wax-ka-bedelladani waxay jirayaan labo toddobaad ilaa iyo 16-ka May 2021, laakiin hal toddobaad kaddib ayaa dib u eegis cusub lagu samaynayaa heerka tallaabooyinka.

Degmooyinka Eidsvoll iyo Nannestad, oo hadda raaca tallaabooyinka heerka B, waa laga saaraya nidaamka tallaabooyinka aageed laga bilaabo saqda dhexe, habeenka isniin 3-da May 2021:

Halkan ayaad ka arki kartaa tallaaboo yinka kala duwan ee hoos imanaya
heerarka kala duwan..